



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
HIRSHABELLE STATE
WARSHEIKH DISTRICT COUNCIL
OFFICE OF THE MAYOR

Reference No: WD-HSS-NCS 0084/2026

Date: 07/08/2026

REQUEST FOR QUOTATIONS

Magaca Adeega: Shirkad inoo qabata howlaha nadaafadda ee Degmada Waarshiikh

Hordhac

Degmada Warsheikh waxay si rasmi ah ugu martiqaadaysaa shirkadaha nadaafadda ee leh khibrad iyo aqoon, kana hawlgala gudaha Degmada Warsheikh, inay soo gudbiyaan qiimeyn (quotation) si ay u bixiyaan adeegyada nadaafadda ee Degmada Warshiikh iyo agagaarkeeda.

Baaxadda Adeegyada

Shirkadda guuleysata waxaa laga doonayaa inay bixiso adeegyada soo socda:

- Nadaafadda maalinlaha ah Degmada Warshiikh.
- Xaaqidda iyo dhaqidda sagxadaha xafiisyada.
- Nadiifinta wadooyinka iyo marinada Degmada.
- Nadiifinta Waaxyaha kala duwan ee Degmada.
- Ka saarista qashinka iyo maarayntiisasi habboon.
- Nadiifinta xarunta degmada iyo agagaarkeeda.
- Bixinta dhammaan qalabka iyo agabka nadaafadda ee loo baahan yahay.
- Hubinta jawi shaqo oo nadiif ah, caafimaad leh, isla markaana ammaan ah.

Shuruudaha U Qalmidda

Shirkadaha danaynaya waa inay soo gudbiyaan dukumentiyada soo socda:

- Shahaadada diiwaangelinta ganacsiga oo ansax ah.
- Lambarka Aqoonsiga Canshuurta (TIN) oo ansax ah, haddii ay khuseeyso.
- Profile-ka shirkadda.
- Ugu yaraan laba tixraac oo adeegyo nadaafadeed oo la mid ah.
- Qiimeyn oo saxiixan oo shaabadaysan oo ka timid wakiilka shirkadda.

Shuruudaha Qiimeynta

Qiimeynta waxaa lagu salayn doonaa:

- U hoggaansanaanta dukumentiyada la codsaday.
- Khibrad la xiriirta adeegyada.
- Awood farsamo.
- Qiime tartan leh.
- Qiime guud oo lacagta u qalma.

Degmada Warshiikh waxa ay xaq u leedahay inay aqbasho ama diido qiimeyn kasta iyada oo aan bixin sabab.

Gudbinta Qiimeynta

Shirkadaha danaynaya waa inay soo gudbiyaan qiimeyntooda ugu dambayn 23/08/2026 kuna soo hagaajiyaan: procurement.warsheikh@gmail.com copyna waa in ay siiyan commissioner@warsheikhdistrict.so

Qaybta Iibka

Degmada Warsheikh

Degmada Warsheikh, Gobolka Shabeellaha Dhexe, Soomaaliya

Md: Maxamed Xasan Mataan

Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Degmada Warshiikh

GOLAHU DEEGAANKA DEGMADA WARSHEIKH

WARSHEIKH DISTRICT COUNCIL

Tel: +252-623333229 | **E-Mail:** Commissioner@warsheikhdistrict.so